**Grenfell Tower**
Memorial Commission

**Rt Hon Michael Gove MP**
Secretary of State
Department for Levelling Up, Housing and Communities

18-kii Nofeembar 2021

Mudane Wasiir,

Marka hore, waxaan jecelnahay inaan kaaga mahadcelinno kulanka aad nala yeelatay oo aad waqti ku bixisay inaad dhageysato welwelkayaga. Waxaan u aragnay kulanka mid wax dhisaya iyo tallaabadii ugu horreysay oo muhiim ah oo lagu soo celinayo kalsoonida ballan qaadka dowladda ee ku saabsan xus ay bulshadu hoggaaminayso.

Waxaan sugeynaa in qeexno meelaha muhiimka ah ee doodda iyo heshiiska. Waan u riyaaqi doonnaa haddii aad qodobadan jawaabtaada ku xaqiijin kartid, si aanu ugu xaqiijino bulshooyinkayaga, oo aanu sii wadno geedi-socodkayaga muhiimka ah ee ku aaddan xus ku habboon oo waara oo loo helo kuwii naftooda waayey. Jawaab degdeg ah oo aanu ka helno warqadan waanu u riyaaqi doonaa, maadaama ay noo suurtagelin doonto inaan dib u bilaabno shaqadii Gudiga, oo ay ku jirto la shaqaynta bulshada, sida ugu dhakhsaha badan.

Waad ku mahadsan tahay furitaanka kulankeena adiga oo mar kale raaligelin ka bixiyay maqaalkii aan dareenka lahayn ee Sunday Times, xanaaqa ay arintani ku keentey qoysaska laga dhintey gaar ahaan, iyo saameynta ay ku leedahay shaqada Guddiga Xuska. Waxa na dhiiri galiyay habkaaga daacadda ah ilaa maanta, inta lagu jirey kulanka kuwa laga dhintey iyo kuwa ka badbaadey ee 13-kii Oktoobar; warqadaada lagu daabacay Sunday Times 14-ka November labadaba, iyo u heelanaanta aad anaga noo heelan tahay.

Kulankeenii, waxaan ku caddeynay in kalsoonidu ay diciif tahay, waxaadna aqbasheen in ka dib dhacdooyinkii dhawaa loo baahan yahay in dib loo dhiso ka dibna la ilaaliyo hadda wixii ka danbeeya. Hadaba waxaa muhiim ah in dowladdu ay si cad u aqoonsato una caddeyso ballan qaadkii ay wasiiradii hore ay bulshadayada u sameeyeen, kasokow ballan qaadkii aad shirkayagii ku soo bandhigtay. Daabacaadda jawaabtaada warqaddan iyo ballanqaadyadan lagu daabaco *gov.uk* waxay gacan ka geysan doonaan in la bilaabo dib u dhiska kalsoonida iyo ilaalinta ballanqaadyadaas sanadaha soo socda. Muhiimad ahaan, Tower-ka oo ah meesha ugu dambaysa ee lagu aasey gacalkeena, waxaad ogolaatay inay lama huraan tahay in go'aan kasta oo mustaqbalkiisa ku saabsan ay dhaliso kalsoonida kuwa sida gaarka ah ay saamaynta ugu yeelatay. Intaa waxaa dheer, waxaad noo xaqiijisay in aan waqtigan laga shaqeyneyn go'aanka Tower-ka oo go'aanka kaliya la dedejin doono si loo ilaaliyo badbaadada bulshadeena.

Isbeddel waara si loo hubiyo in aysan qoysas kale u dhibtoon sida anaga nagu dhacdey iyo geedi-socodka loo aadayo xus ku habboon oo waara waa lama huraan, laakiin sida aad aqoonsatay kuwani waa qayb ka mid ah sawirka guud. Si aan u bilowno inaan bogsoonno, waxaan u baahanahay shaqsiyaad lagula xisaabtamo lumitaanka nafta gacalkayaga. Sida aan ugu celceliney ee aad si toos ah uga maqashey qoysaska, cadaaladdu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah geedi-socodkayaga. Waayo-aragnimada qoysaska Hillsborough waxay muujisey muhiimadda ay leedahay in la ilaaliyo dhammaan cadaymaha si loo dhimo fursadaha maxkamadaynta fashilanta iyo isla xisaabtanka suurtagalka ah ee lumaya. Kuma filna mas'uuliyiinta caddaaladda inay sheegaan inaysan baahi dheeraad ah u qabin dhismaha, ama inay 'ku kalsoon yihiin' in Tower-ka aan loo baahnayn iyada oo qayb ka ah maxkamad kasta oo mustaqbalka ah. Waxaan u baahanahay hubin buuxda iyo caddeyn arintan si aan u bilowno kalsooni qabid.

Waxaan carrabka ku adkeynay baahida loo qabo in lagu kalsoonaado talada badbaadada Tower-ka iyo go'aan kasta oo ku saleysan. Waxaad sheegtay inaad aragtay qaar ka mid ah warbixinnadii injineernimada ee ugu dambeeyay iyo in talada ay caddahay in <u>Tower-ku uu hadda ammaan yahay</u>. Aad ayey muhiim u tahay in arintan ay caddahay si looga fogaado mala-awaal joogto ah iyo kalsooni darro. Haddii talada badbaadadu ay isbedelaan, waxaad dib u xaqiijisay in dawladdu ay taageeri doonto qoysaska laga dhintay iyo kuwa badbaaday iyo bulshada si ay u magacaabaan injineer dhisme oo madax bannaan oo ay iyagu doortaan. Arintani waa inay ku dhacdaa waqti ku fillan oo si buuxda loo galo Tower-ka, iyo sidoo kale xog kasta oo ay dawladdu hore u hayso. Daah-furnaantani waxay ahayd mid soo jiidasho leh, waxaana kaaga mahadcelineynaa inaad ku celisay inaysan jirin "wax la qarinayo".

Ugu danbeyntii, waxaan kaaga mahad celineynaa aqoonsiga aad aqoonsatey horumarka ay sameeyeen Gudiga. Waxaa naga go'an, shaqsiyo ahaan iyo Guddi ahaan, inaan sameyno xus joogto ah si loo hubiyo wixii ka dhacay Grenfell inaan marnaba la iloobin. Waxa aad aqoonsatay in gudigu yahay hay'ad madax bannaan oo leh mas'uuliyad loo soo doortay, shaqadayadana ma gudan karno haddaanan kalsooni ka haysan bulshadayada, gaar ahaana garab istaaga qoysaskii laga dhintay. Waxaad si waxtar leh u xaqiijisay muhiimada ay leedahay in la hubiyo in qof kasta oo danaynaya in uu fikradahooda ka dhiibto xuska in uu sidaas ugu gudbiyo Gudiga oo aan loo marin dawladda dhexe. Arintani waa muhiim maadaama aan rabno inaan si toos ah ula hadalno qof kasta oo ay saameysay. Doorkayagu waa in aan matalno aragtidooda ku saabsan xusuusta mustaqbalka.

Habka aanu ula shaqayno qoysaska iyo bulshada waxa uu ku salaysan yahay dareen iyo ixtiraam; kuwani waa wada-hadallo aan lagu degdegi karin. Waxaad ogolaatay in geedi-socodkii iyo go'aamada laga soo saarayo Tower-ka loo baahan yahay in tallaabo-tallaabo iyo xawliga bulshadu ku socoto.

Dhammaanteen waxaan ku jirnaa geedi-socod, hadafkeena aan wadaagnona waa in wixii ka dhacay Grenfell 14-kii Juunyo 2017 aysan waligood iloobin jiilalka mustaqbalka.

Mar labaad, waxaanu kaaga mahadcelinaynaa furfurnaantaada, daacadnimadaada, iyo rabitaankaaga inaad nala shaqeyso.

Waxaan sugeynaa jawaabtaada degdega ah.

Mahadsanid

Adel Chaoui, Sandra Ruiz, Hassan Hassan, Nabil Choucair, Hanan Wahabi, Mohammed Rasoul, Abe Abebe, Hanan Cherbika, Susan Al-Safadi, Andrea Newton

Michael Lockwood iyo Thelma Stober

**Grenfell Tower Memorial Commission**